**Ku soo dhawoow Consumer Direct Care Network Washington (CDWA)!** Eeg liiskan tixraaca si aad ula socoto hab-socodka shaqaalaysiintaada ee CDWA. Waad daabici kartaa ama kaydin kartaa waxaadna ku dhamaystiri kartaa elektaroonig ahaan. Waxaad u baahan doontaa cinwaan iimayl oo sax ah si laguu shaqaalaysiiyo. Hawlaha shaqaalaysiinta waxaa lagu dhamaystiraa elektaroonig ahaan. Waxaa wanaagsan inaad isticmaasho midkood kumbiyuutar ama tablet si aad u dhamaystirto hawlahaaga. Xogta meesha lagala xidhiidhayo CDWA waxay ku jirtaa dhamaadka liiskan tixraaca.

**Si laguugu shaqaalaysiiyo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, ha habsaaminin hawl lagaaga baahan yahay.** Waxaad ka heli doontaa iimaylkaaga ugu koowaad CDWA ka dib markaad gudbiso codsigaaga. Haddii aadan helin iimayl, fiiri folder-kaaga spam/junk. Hubso inaad ku darto cdcn@myworkday.com iyo infoCDWA@consumerdirectcare.com liiskaaga iimaylada wax kuu soo diri kara si aadan u seegin macluumaad muhiim ah.

**Ha bilaabin inaad u shaqayso Macmiilkaaga ilaa iyo aad ka hesho taariikhda aad 'Okay to Provide Care' ('Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso') CDWA.** Waxaad heli doontaa taariikhdan ka dib markaad bogto tallaabooyinka hoose. Wax mushahar ah kuma heli doontid haddii aad bilowdo inaad shaqayso ka hor taariikhdan.



**1. ★ Tallaabada IP: Codso -** tilmaamaha shaqada ayaa laga heli karaa halkaan

- ☐ Ka codso ConsumerDirectWA.com/Careers
- ☐ Ku bilow inaad akoon samaysato - cinwaankaaga iimaylka waa inuu shaqaynayo oo uusan horay uga diiwaangashanayn CDWA
- ☐ Markaad gudaha u gasho, waxaa soo boodi doona faariinta 'Congratulations' ('Hambalyo'). Xir fariinta soo booday si aad u sii wadato codsigaaga.

  Xogta la bixinayo: Haa/Maya – Macmiil horay ma u lahayd, SSN/ITIN, taariikhda dhalashada
- ☐ Buuxi Foomka Oggolaanshaha Baaritaanka Taariikheed ee BCCU

  Lambarka xaqiijinta ee 10-ka god ah ____________________

  ⚠ Magaca kuugu qoran foomka oggolaanshaha waa inuu la mid yahay magaca kuugu qoran sharciga Aqoonsiga ee ay dawlada ku siisay

  Ka hel xog dheeraad ah iyo tilmaamaha muuqaalka halkan
- ☐ Lambarka xaqiijinta ee 10-ka god ah ee CDWA lagu siiyay codsiga
- ☐ Gudbi codsiga
- ☐ Waxaad heli doontaa iimayl ogaysiis ah oo kaaga mahadcelinaya inaad codsi soo dirtay ka dib markii codsigaaga uu gaaro CDWA

**2. ❖ Tallaabada CDWA**: Eegista codsiga. Waxay sameynayaan baaritaan taariikheed iyaga oo isticmaalaya magaca iyo taariikhda dhalashada.

**3. ❖ Tallaabada CDWA**: Waxay samaynayaan eegista Kartida iyo Ku Habboonaanta Dabeecada (**CC&S**). Kaliya waxaa looga baahan yahay baaritaanada taariikheed ee qoraya 'Review Required' i.e 'Review Required' ('Dib-u-eegi Ayaa Loo Baahay Yahay.') Loogama baahan doono tallaabadan qof walbo. CDWA ayaa iimayl kugula soo xiriir doonta si ay kuu siiso Warqadda RAP. Raac tilmaamaha ku jira iimaylka ee sheegaya waxa la rabo iyo meesha laga rabo.

**★ Tallaabada IP: Ballanta Baaritaanka Taariikheed ee Faraha** – Iimaylka laga helay CDWA

Iimay ay soo dirto CDWA ka dib markaad ka gudubto baaritaanka taariikheed ee BCCU ama ka dib marki la sameeyo eegista CC&S.

- ☐ Qabso ballanta - iimaylka waxaa ku jiro tilmaamaha sida loo qabsado.
- ☐ Saxeex oo dib ugu soo celi foomka CDWABackgroundCheck@consumerdirectcare.com

Lambarkaaga OCA waxa laga heli karaa foomamka lagu soo diray iimaylka ka yimid CDWA. Waxaad la sii wadan kartaa tallaabada shaqaalaysiinta CDWA ka hor intaan la dhamaynin tallaabadan. Sikastaba ha ahaatee, waxaa qasab ah in la qabto ballantaada faraha ka hor inta aadan helin inaad Okay to Provide Care (Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso).

**4. ♦ Macmiilka/Wakiilka La Oggolyahay. Tallaabada: Xaqiijinta Is waafajinta Macmiilka / IP**

- ☐ Macmiilka ama Wakiilka La Oggolyahay wuxuu ka xaqiijinayaa CDWA in Macmiilka uu rabo inuu kula shaqeeyo.

  Tallo: Si aad wax u dedejiso, u sheeg Macmiilkaaga ama Wakiilkaaga La Oggolyahay inuu la xiriiro CDWA si ay u xaqiijiyaan inaad la shaqayn doonto. Xaqiijinta waa inay ka timaado Macmiilka, Wakiilka La Oggolyahay, ama Maamulaha Kiiska ee Macmiilka.

Wali ma aadan helin Macmiil? Akoon ka samayso Carina.org si uu kaaga caawiyo inaad Macmiil hesho.

**5. ★ Tallaabada IP: Hawlaha Shaqaalaysiinta ee Workday** – Waxaad ku heli doontaa iimayl xilliga aad bilaabi karto tallaabooyinkan. Sahminta Asaasiga Ah ee Workday

Waa inaad riixdo badhanka 'Submit' ('Gudbi') ee hawl walbo si aad ugu gudubto mida xigta.

- ☐ Luuqadda La Doorbidayo
- ☐ Canshuur Dhimista Shaqo Abuurista Koox Gaar ah (ikhtiyaari)
- ☐ Macluumaadka Shaqsiyeed
- ☐ Macluumaadka Meesha Lagaala Xidhiidho
- ☐ Dib U Eeg Macluumaadka Meesha Lagaala Xidhiidho. Guji badhanka oranjiga ah ee 'Refresh' ('Cusbooneysii') ee ku jira Sanduuqaaga Workday. Riix 'Submit' ('Gudbi') markale ka dib markaad dib u eegto.
- ☐ Xog-uruurinta DocuSign I-9 - Geli magaca, iimaylka, iyo lambarka taleefonka ee qofka 18 jirka ka wayn ee dhamaystiri doona Qaybta 2 ee I-9. Waa inuu ahaadaa qof aan adiga ahayn. Guji badhanka Submit (Gudbi).

⚠ Haddii aad aragto shaashada cad oo eber ah, cusboonaysii birowsarka internetka ama ka bax oo dib u gal si aad u bilwdo hawsha xigta.

**6. ★♦ Tallaabada IP & Macmiilka ama Wakiilkooda: Form I-9 (Foomka I-9)** – Ku buuxi DocuSign. Iimayl iyo qoraal wata gujo-raac laga buuxiyo.

- ☐ Qaybta 1 – Waxaa buuxinaya adiga
- ☐ Qaybta 2 – Waxaa buuxinaya Macmiilka/Wakiilka La Oggalyahay ama qof walbo oo ay u wakiishaan inuu u buuxiyo oo u saxiixo baddelkooda

⚠ Waxaa dib u dhac ku imaanayaa shaqaaleysiinta haddii aad adiga shaqsiyan saxiixdo Qaybta 2, aad isticmaasho dukumiintiyo dhacay, ama aad isticmaasho dukumiintiyada qof kale.

**7. ❖ Tallaabada CDWA:** Dib u eeg Form I-9 (Foomka I-9). Waxaad ku heli doontaa iimayl markaad u gudbi karto tallaabada xigta.

**8. ★ Tallaabada IP: Dhamaystir Hawlaha Shaqaalaysiinta ee Workday** – Iimayl laguu soo dirayo oo ku ogaysiinaya inaad bilaabi karto tallaabooyinkan

Waxaad heli doontaa taariikhda shaqaalaysiinta. **Tani ma ahan xilliga aad shaqa bilaabi karto. Taariikhdan waa xilliga aad buuxisay I-9.**

- ☐ Dib U Eeg Dukumiintiyada – Caddeynta Shaqaynta IP ee CDWA, Buug–gacmeedka IP ee CDWA, Tabbabarka Shaqada ee IP
- ☐ Xog-uruurinta Kaarka Midowga ee SEIU 775
- ☐ Doorashada Tallaalka Cagaarshowga B
- ☐ Xog-uruurinta Gaari Wadida/Gaari Wadid La'aanta – waa inaad haysato laysanka darawalnimada oo shaqaynaya si aad u bixiso adeegyada gaadiid raaca
- ☐ Xulashada Nooca Lacag Bixinta – sida aad rabto inaad ku hesho jeega mushaharkaaga (Lacag Wareejinta Elektrooniga Ah ama kaarka Wisely)
- ☐ Canshuurta Mushaharka Laga Jaro ee Federaalka (W-4)
- ☐ Aqoonsiga Xaalada Halyeey Ciidan
- ☐ Geli Cidda Lala Xidhiidhayo Xaaladaha Degdegga ah
- ☐ Guji badhanka oranjiga ah ee 'Refresh' ('Cusbooneysii')
- ☐ Hawsha Ugu Danbaysa ee IP – gujo-raacyada lagu galo Tababarka Shaqada & Badqabka (la isfaro oo lacag leh), 1 saac oo la dheereeyay oo ah Muuqaalka Tabbabarka Shaqada ee CDWA (ikhtiyaari lagac leh), muuqaalka SEIU 775 Orientation (ikhtiyaari lagac leh)

**9. ★ Tallaabada IP: Tababarka Shaqada & Badqabka** (5 saacadood ayaa lagu dhameeyaa)

☐ Ka dhamaystir Workday

IP-yada dhammaan loogama baahna. Haddii aad aaminsan tahay inaad ka reeban tahay, u soo gudbi shahaadooyinkaaga CDWA: Halkan ka hel tilmaamaha

Waxaa si otomaatig ah lacag laguugu siin doonaa tabbabarkan ka dib markaad bogto.

**10. ❖ Tallaabada CDWA** - Eeg dhammaan macluumaadka shaqaalaysiinta. Bixi taariikhda Okay to Provide Care (Diyaar Loo yahay In Daryeel La Bixiyo) markay wax kasta hagaagaan.

- Tababarka Shaqada & Badqabka in la dhamaystiray (marka laga reebo in laga dhaafay)
- Ballanta baaritaanka taariikheed ee faraha in la qabtay
- Macmiilka inuu oggolaansho shaqaynaya ka haysto DSHS – Ma bilaabi kartid inaad u shaqayso Macmiil aanan haysanin oggolaansho shaqaynaya

**11. ★ Tallaabada IP: Hel Okay to Provide Care (Diyaar Loo yahay In Daryeel La Bixiyo)** – Iimayl laga helo CDWA

Tani waa maalinta koowaad ee aad bilaabi karto inaad u shaqayso macmiilka adiga oo mushahar qaadanaya.

Taariikhda Okay To Provide Care (Diyaar Loo yahay In Daryeel La Bixiyo): ______________________________

- Waxaad haysataa **120 maalmood** oo ka bilaabanaya taariikhda Okay To Provide Care (Diyaar Loo yahay In Daryeel La Bixiyo) si lagaaga qaado faraha. Haddii aanan helin natiijooyinka farahaaga, waxaa laguugu soo rogayaa amarka shaqo joojinta. Ma shaqayn kartid, mana heli doontid wax mushahar ah inta uu amarka ku saaran yahay.
- Waxaad haysataa **14 maalmood** inaad ku soo gudbiso codsigaaga Shahaadada Caawiyaha Daryeelka Guriga (HCA) (haddii loo baahdo).

| **12. ★ Caddeynta Xariirka** – Tilmaamaha waxay ku jiraan iimaylka Taariikhda Okay to Provide Care (Diyaar Loo yahay In Daryeel La Bixiyo) |
|---|
| Tani waa tallaabadaada ugu danbaysay ee hannaanka shaqaalaysiinta!<br>☐ Gal bogga intarnetka ee DirectMyCare oo buuxi su'aalaha caddeynta.<br>Jawaabaha su'aalahan ayaa xaq kuu siin kara qaar ka mid ah ka dhaafitaanada canshuurta waxayna go'aamin doonaan Nooca Tabbabarka ee laguugu qori doono. Macluumaad dheeraad ah oo Ku Saabsan Noocyada Tabbabarka.<br>⚠ Ma awoodi doontid inaad gudbiso saacadaha shaqada ilaa iyo aad ka buuxiso su'aalahan. |

| ★ TALLAABOOYINKA XIGA | |
|---|---|
| ☐ | **Niska(nisaska) Shaqada Tijaabada ah** (ikhtiyaari ah)<br>• Muraajacee inaad saacado u gudbiso CDWA adiga oo isticmaalaya bogga intarnetka ee DirectMyCare iyo/ama app-ka CareAttend.<br>• Tilmaamayaasha shaqada oo dheeraad ah iyo muuqaalo ku saabsan gudbinta saacadaha ayaa laga heli karaa halkan |
| ☐ | **Baaritaanka taariikheed ee faraha** in la bogo<br>• CDWA waa inay ku hesho natiijooyinka 120 maalmood gudahooda oo ka bilaabanaya taariikhda Okay to Provide Care (Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso). Haddii aanan kuwan la helin, waxaa lagu gelin doonaa hakad mana awoodi doontid inaad shaqayso. |
| ☐ | Soo gudbi **codsigaaga Shahaadada Caawiyaha Daryeelka Guriga (HCA)** (haddii loo baahdo)<br>Taariikhda kama danbaysta ah (14 maalmood ka dib taariikhda Okay to Provide Care (Aad Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso): ______________________<br>• Ha bixinin wax khidmad ah – ku calaamadee 'state pay' ('gobalka ayaa bixinaya') codsiga korkiisa.<br>• SEIU 775 Benefits Group ayaa kuu sheegi doona tabbabarka aad u baahan tahay inaad bogto. Haddii aad u baahan tahay inaad bogto Tabbabarka Aasaasiga Ah 70, waxaa laguu tixgelinayaa Caawiyaha Daryeelka Guriga ee caadiga ah (HCA).<br>• Haddii ay kugu yar tahay aqoonta luuqadda Ingiriisiga (LEP), waxaad xaq u yeelan kartaa shahaado 60 maalmood oo ku meel gaar ah oo dheeraad ah. Ku calaamadee codsigaaga inaad rabto shahaadada ku meel gaarka ah. |
| ☐ | **Dhamaystir Tabbabarka Aasaasiga Ah** – SEIU 775 Benefits Group ayaa kaala soo xidhiidhi doonta midan.<br>Taariikhda kama danbaysta ah (120 maalmood ka dib taariikhda Okay to Provide Care (Aad Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso): ______________________ |
| ☐ | Samee **imtixaanka shahaada siinta ee Caawiyaha Daryeelka Guriga (HCA)**<br>Taariikhda kama danbaysta ah (200 maalmood ka dib taariikhda Okay to Provide Care (Aad Diyaar u Tahay Inaad Daryeel Bixiso): ______________________ |

| **Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino! Isticmaal mid kasta oo ka mid ah dhigaaladan haddii ay wax kugu istaagaan ama aad su'aalo qabto.** | |
|---|---|
| **Bogga Intarnetka ee CDWA** | www.ConsumerDirectWA.com |
| **Qalabka aad iskaa wax iskuugu qabato** | Dhigaalo / Dhigaalada IP / Qalabka Shaqaalaysiinta ee IP |
| **Iimaylka** | infoCDWA@ConsumerDirectCare.com |
| **Wicitaanka Taleefonka** | 866-214-9899 |
| **Ballamaha Onleenka ah iyo Kuwa Xafiiska** | Dhigaalada / Ballan Qabso |
| **Munaasabadaha Bulshada ee Qof Ahaanta Loo Xaadiro** | Dhigaalo / Jadwal Taariikheedka Aqoon Kororsiga Onleenka Ah iyo Munaasabadaha |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Arabic العربية | 866.215.6909 | Cantonese 粵語 | 866.216.3065 | Khmer អក្សរខ្មែរ | 866.215.7610 | Korean 한국어 | 866.215.6907 |
| Lao ພາສາລາວ | 866.215.8044 | Mandarin 普通话 | 866.216.1752 | Russian русский | 866.215.4069 | Somali Soomaali | 866.215.5669 |
| Spanish Español | 866.215.0131 | Tagalog Tagalog | 866.215.3817 | Ukrainian Українська | 866.215.4674 | Vietnamese tiếng Việt | 866.215.2762 |